



**Tababarka Qaxootiga Machadka
Hoggaaminta Dagganaha
(Resident Leadership Academy
Refugee Training) iyo Warbixinta
Skaanka Deegaanka
(Environmental Scan Report)
2017**

TUSMADA

3	Mahad Celinta
4	Horudhaca
5	Wararkii Hore
6	Ururada Iskaashiga Qaxootiga RLA
7	Diyaarinta iyo Logistikada
8	Qeybaha RLA
9	<i>RLA #1 Gobolka Bari</i>
12	<i>RLA #2 Gobolka Bari</i>
16	<i>RLA #3 Gobolka Dhexe</i>
20	Soo Koobidda Skaanka Deegaanka Qaxootiga
21	Daruusta Laga Qaatay
22	Gabogabada



MAHAD CELINTA

Iyadoo ku hadleysa magaca Iskaashiga Horumarinta Caafimaadka Bulshada (Community Health Improvement Partners) (CHIP) iyo Wakaalada Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha Dagmada San Diego (County of San Diego Health and Human Services), Iskaashiga Fullinta Bulshada (Community Action Partnership) waxay rabtaa in ay u mahad celiyo Taaageerada iyo Horumarinta Imaadeyaasha Cusub (Newcomers Support and Development) iyo Adeegga Qoyska Soomaalida San Diego (Somali Family Service of San Diego) shaqada ay qabteen iyo wada shaqeynta si loo dhamaystiro Brograamkaan Machadka Hoggaaminta Dagganaha Qaxootiga (Refugee Resident Leadership Academy Program RLA). Brograamka wuxuu u ogolaaday CHIP in uu dadka daggan ka qorto qaxootiga bulshadaha iyo si dhab ahaan loo fulliyo ka qeybgalka bulshada loona dhiirigeliyo ka-qeybgaleyaasha RLA si ay isbaddal wanaagsan ugu sameyaan xaafadahooda taaso kaalmo ka geysan doonto dhismaha bulsho caafimaad qaba, ammaan ah, oo horumar ka gaara San Diego. Intaas kaddib, waxaan rabnaa in aan aad ugu mahad celino dhallinta qaxootigta iyo dadka daggan bulshada ka soo qeybgashay RLAyada iyo goleyaasha bulshada si ay wax qiimo leh iyo aragti ugu biiriyaan baahida iyo hantida bulshada qaxootiga.

HORUDHACA

Ururada Iskaashiga

Bishii Diseembar 2016, Iskaashiga Fullinta Bulshada (Community Action Plan) (CAP), kaddib marka ay adeegsatay maalgelinta Adeegyada Shaqada Qaxootiga (Refugee Employment Services), waxay heshiis la gashay CHIP, taasoo ah urur jira 25 sanno, aan fa'iido doonin oo xoogga saara caafimaadka kuna saleysan San Diego (www.sdchip.org), si ay u fulliso saddax Machadaha Hoggaaminta Dagganaha (Resident Leadership Academies) (RLA) iyo si loo fulliyo skaanka deegaanka, marka la isticmaalo modelka falanqeynta Xoogga, Fursadaha, Hamiga, iyo Natijadaha (Strengths, Opportunities, Aspirations, and Results (SOAR), gudaha Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha (HHSA) Gobolada Dhexe iyo Bari. Ujeedada RLA waxay tahay in la dhiso awoodda hoggaaminta dadka ka tirsan bulshadaha qaxootiga, iyo in la baro in ay qaadaan talaabo lagu horumariyo caafimaadka iyo ammaanka dadka daggan gudaha xaafadahooda. Ujeedada skaanka deegaanka waxay tahay in wax badan laga barto fursadaha iyo meelaha looga baahan yahay koriimada gudaha bulshadaha qaxootiga. Macluumaadka laga soo aruuriyay RLA iyo skaanka waxay ku qoran yahiin gudaha warbixintaan, si loogu isticmaalo horumarinta Qorshooyinka Adeegyada Shaqada Qaxootiga San Diego (County of San Diego Refugee Employment Services Plans), iyo si loo ogeysiyo iskaashatada bulshada, kuwa danneeyo, bixiyeyaasha adeegga, iyo dawlada hoose arrimaha la xariira bulshadaha qaxootiga San Diego.

HHSA waxay mashruucaan la bilowday CHIP si loo aqoonsado muhiimadda baahida bulshada qaxootiga, iyo in la qaado talaabooyin si dadka qaxootiga loogu qalabeeyo xirfadaha muhiimka ah ee loo baahan yahay si loo fulliyo mashaariicda horumarinta bulshada loogu talagalay in lagu baddalo tayada nolosha bulshadahooda. Si looga jawaabo ujeedada hawsha Qaxootiga RLA (Refugee RLA), CHIP waxay ku dhaqaaqday in ay iskaashi istaategik ah la samayso labo ka mid ah Ururada Bulshada Ku Saleysan Jinsiyadda (Ethnic Based Community Organizations) (ECBOs) kana jira Gobolada Dhexe iyo Bari, si loo qiimeeyo awoodooda iyo danaha ay ka leeyahiin xoojinta iyo ka qeybgalka mashruuca. Kaddib marka dhowr shirar (telefoon iyo qof ahaan) lala yeeshay tiro fiican ururada, CHIP waxay u socotay horay si ay u adkeyso heshiisyada qandaraaska lala galay Adeegga Qoyska Soomalida (Somali Family Service) (SFS) ee Gobolka Dhexe, iyo Taakuleynta iyo Horumarinta Imaadeyaasha Cusub (Newcomers Support and Development) (NSD) ee Gobolka Bari. Labada urur waxay tilmaameen ka-qeybgelinta bulshada iyo xoojinta in ay bartamo u yahiin horumarinta ganacsiga, dhaqanka, kaddibna labada urur waxay muujiyeen in ay daacad ka yahiin taageerada la siiyo noocada hawlaha ku qoran ujeedada shaqada Qaxootiga RLA la hayso CHIP.

Ujeedada dadaalkaan waxay ahayd in la kordhiyo kartida ku jirto bulshadaha qaxootiga San Diego in ay qaadaan talaabo si loo horumariyo caafimaadka iyo ammaanka dadka daggan; ahamiyadda RLA waxay ahayd in la kordhiyo awoodda bulshada hoggaamiyeyaasha qaxootiga si loo aqoonsado baahida bulshadooda iyo si loogu doodo isbaddal.

WARARKII HORE

Machadyada Hoggaaminta Dadka Daggaan (Resident Leadership Academies) (RLAs) waxay tababar iyo qalab siiyaan hoggaamiyeyasha deegaanka si ay hawl uga qabtaan xaafadhooda si loo dhisaan dhaqan u roon caafimaadka, si loo horumariyo ammaanka, iyo si loo abuuro bulsho nool. Sannadkii FY 2011-12, RLAYada waxaa hoggaamiyay Dagmada San Diego sida faragelinta Caafimaadka Dadweynaha (Public Health) waxaana maalgeliyay Sharciga Dib u Kicinta iyo Dib u Maalgelinta Mareykanka (American Recovery and Reinvestment Act) ee laga maamulo Xarumaha Kantaroolka Cudurada (Centers for Disease Control). Kaddib marka iskaashi lala samayay CHIP, RLA waxaa la aasaasay 2011 kaddibna laga bilaabo aasaaskeeda, brograamka wuxuu la kulmay horumar badan iyo wuxuu awoodda hoggaaminta ka abuuray xaafado badan oo ku yaal Dagmada San Diego. RLA waxay ka kooban tahay 10 kulan, waa brograam ku saabsan hoggaaminta caafimaadka dadweynaha oo ku saleysan manhaj ujeedadiisu tahay in la habeeyo dadka daggan bulshadaha in yar loo adeego, tiro yar mattasho xagga madaniyadda, siyaasadda iyo wax ka baddalidda siistemka, u doodidda iyo fullinta xalka caafimaadka dadweynaha ee ku sii jeeda horumarinta ammaanka, helitaanka raashin caafimaadka u roon iyo tayada fursadaha jimicsiga heerka xaafadda

Saddax kulan oo ku saabsan tababarka Qaxootiga RLA (Refugee RLA) lagan fulliyay Gobolka Dhexe (hal kulan) iyo Gobolka Bari (labo kulan) kaddib, CHIP waxaa kaloo loo xil saaray hoggaaminta skaanka deegaanka gobolada, in ay adeegsato habka falanqeynta SOAR, ilaha ay heli karaan qaxootiga si ay u abuuraan hal ilo ay bulshada ku aqoonsato ilaha iminka jira si loogu adeego bulshada qaxootiga, si loo aqoonsado godadka ka jira adeegyada ee lagama maarmaanka u ah in lagu taageero qaxootiga xagga caafimaadka, ammaanka, iyo isku filnaanta, iyo si loo fulliyo Wareysiyada Laga Qaado Warsidaha Muhiimka ah (Key Informant Interviews) ee lala yeesho kuwa danneeya bulshada iyo kooxaha iminka la shaqeeyo dadka qaxootiga.

Sida ku saleysan xogta laga soo qaaday Xafiiska Xogta Ganacsiga Dagmada (County's Office of Business Intelligence), labada gobol sare ee ka jira San Diego ay qaxootiga ka raadsadaan adeegyada kaalmada dadweynaha waxay ka jiraan HHSA Gobolada Dhexe iyo Bari (HHSA Central and East Regions), sidaas darteed falanqeynta RLA iyo SOAR waxay xoogga saareen halkaas bacdamaa kuwaan mattalaan meelaha ugu balaaran ay qaxootiga ka daggan yahiin San Diego CAP lana aqoonsan yahay baahida loo qabo in bulshadahaan lagu xoojiyo fursadaha hoggaaminta iyo ka-qeybgalka madaniga, iyo RLAYada laga helo fursad ay si toos ah ula shaqeeyaan kuwa daneeya qaxootiga iyo dadka daggan in ay soo aruuriyaan macluumaadka sida wanaagsan u taageera bulshadaha qaxootiga San Diego. Skaanka deegaanka iyo falanqeynta waxay suurto geliyaan in macluumaadka muhiimka ah si toos ah looga aruuriyo bulshada taasoo ku hoggaamin doonto horumarka loo

baahan yahay in lagu sameeyo siistemyada iminka jira, iyo si loo hagaajiyo helitaanka iyo tayada ilaha si loo taageero loona aqoonsado mudnaanta cusub iyo midda gaarka ah.

Dagmada San Diego (County of San Diego), Wakaaladda Adeegga Caafimaadka iyo Aadanaha (Health and Human Service Agency) (HHSA), waxay taageersan yahiin fikradaa *Nolosha Wanaagsan ee San Diego (Live Well San Diego)* xagga Caafimaadka Wanaagsan, Ammaanka Nolosha, iyo Horumarka. *Si Wanaagsan Ugu Noolow San Diego (Live Well San Diego)* waxaa soo saaray San Diego, waa aragti dhamaystiran, ku cusub gobolka oo isu keenta dadaalka iskaashatada gudaha iyo dibadda dawladda Dagmadda si dhamaan dadka daggan loogu kaalmeeyo in ay ahadaan kuwo qaba caafimaad, ammaan, iyo gaara horumar. Dhamaan iskaashatada HHSA iyo qandaraasleayaasha, ilaa inta suurto galka ah, waxaa laga filaa in ay horumariyaan aragtida. Caafimaad Wanaagsan waxay xoogga saartaa hagaajinta caafimaadka dadka daggan iyo xulashada caafimaadka taageersan. Ammaanka Nolosha (Living Safely) waxay raadisaa in la hubiyo in dadka daggan laga badbaadiyo dambiga iyo ku xadgudubka, nabadgelyada deriska, iyo bulshadaha u adkeysta musiibooyinka iyo degdegga. Horumarka wuxuu xoogga saara horumarinta gobolka ay dadka daggan ka heli karaan nolosha tayada sare.

Macluumaadka ku saabsan *Si Wanaagsan ugu Noolow San Diego (Live Well San Diego)* waxaa laga heli karaa bogga internetka Dagmada iyo bogga internetka loo xil saaray aragtida:

- http://www.sdcountry.ca.gov/hhsa/programs/sd/live_well_san_diego/index.html
- <http://www.LiveWellSD.org>

URURADA ISKAASHIGA QAXOOTIGA RLA (REFUGEE RLA PARTNER ORGANIZATIONS)

Iskaashiga Horuamrinta Caafimaadka Bulshada (Community Health Improvement Partners) (CHIP): CHIP waa hoggaamiyaha jira oo ku hawlan abaabulka xalka wada shaqeynta si wax looga qabto arrimaha caafimaadka bulshada ee muhiimka ka ah gobolka San Diego. Waxaan u jeednaa bulshado uu qof kasta ka helo caafimaad wanaagsan iyo fiyoobi. Waxaan ku shaqeynaa ujeedadena ah in aan xal muddo dheer u helno baahida caafimaadka mudan loona adeegsado wada shaqeyn, u doodid iyo ka-qeybgalka bulshada. Sida ku saleysan habka qiimeynta adag ee lagu sameeyo baahida caafimaadka bulshada, mudnaanta caafimaadka bulshada iminka ee CHIP waa cayilka, caafimaadka madaxa, ka hortagga dagaalka iyo dhaawaca, helitaanka daryeelka, iyo arrimaha bulshada ee la xariira caafimaadka. CHIP waxay bulshada ku taageertaa hawlaha aan wax laga qaban doonin ama kuwa wadajir ahaan loo qaban karo si wanaagsan. Himilooyinka Istraatiijiyada CHIP (Strategic Goals of CHIP) waxaa ka mid ah:

- Xoojinta dadka daggan deegaanka si loo abuuro isbaddal wanaagsan marka la horumariyo ammaanka dadweynaha, tayada nolosha iyo fursadaha jimicsiga lagana fulliyo bulshadaha in yar loo adeego.
- Lagu dadaalo kordhinta helitaanka raashin iyo cabbitaan caafimaadka u roon, iyo kordhinta fursadaha ammaanka jimicsiga;
- Laga shaqeeyo kordhinta isticmaalka raashinka deegaanka, caafimaadka u roon, la helo xilliyada, lana siiyo dugsiyada iyo isbitaalada.
- Ka hortagga iyo tirtiridda iska qaadidda nafta;
- Dhiirigelinta guryaha nolosha madax banaan ee tayada sare looguna talogalay dadka waaweyn ee qaba xanuunka madaxa;
- Hubinta aqoonta caafimaadka qofka si loo taageero gaarista go'aanka caafimaadka ku habboon;

Maanta, CHIP waxay ku hawlan tahay arrimaha caafimaadka ugu muhiimsan San Diego, waxayna u adeegsataa dhowr brograam iyo qorshooyin, sida Machadka Hoggaaminta Dagganaha (Resident Leadership Academy), Guddiga Ka Hortagga Iska Qaadidda Nafta (Suicide Prevention Council), Qorshaha Cayilka Caruurnimada Dagmada San Diego (San Diego County Childhood Obesity Initiative), Ururka Nolosha Madaxbanaan (Independent Living Association), Mashruuca Kaiser Permanente Cuntada Caafimaadka Nolosha Firfircoon (Healthy Eating Active Living Zone Project) - Lemon Grove, Mashruuca Habka Jinsiyadda iyo Isirka ee loo Abaaro Caafimaadka Bulshada (Racial and Ethnic Approaches to Community Health Project) - Chula Vista, Kooxda Hoggaaminta Nafaqada iyo Daryeelka Caafimaadka (Nutrition and Healthcare Leadership Team), Xoogga Beerta ilaa Dugsiga (Farm to School Task Force), iyo Aqoonta Caafimaadka San Diego (Health Literacy San Diego).

Adeegga Qoyska Soomaalida (Somali Family Service) (SFS): Adeegga Qoyska Soomaalida San Diego (Somali Family Service of San Diego) waxaa la aasaasay 2000, waa urur aan ku shaqeynin fa'iido, urur ku saleysan bulshada una adeega bulshada. Laga bilaabo markii la aasaasay,

ururka wuxuu soo saaray brograamyada iyo adeegyada hiddo iyo luqad ahaan ku habboon xubnaha bulshada Soomaalida San Diego iyo bulshadaha kale ee Afrikada Bari, taasoo fududeysay la qabsiga iyo sugtay in ay ku guuleystaan hawlaha gurigooda cusub. San Diego, waxaa aad u maqan adeegyada taakuleynta la siiyo muhaajiriinta iyo qaxootiga Soomaalida iyo Afrikada Bari. Adeegga Qoyska Soomaalida San Diego (San Diego Somali Family Service) waxay buuxisaa duleelkaan ka jira bulshada, bacdamaa inta badan ururada u adeega muhaajiriinta iyo qaxootiga Afrikada Bari aysan lahayn shaqaale ama si gaar loo xil saarin dadkaan. Oraahda Ujeedada Adeegga Qoyska Soomaaliga (Somali Family Service), hoggaamiyaan horseedyadeeda bulshada, waxay qoysaska Soomaalida iyo Afrikada kale ku kaalmeynaa in ay noqdaan xubno mas'uul ah, madax banaan iyo wax ku biiriya San Diego iyaga oo adeegsada brograamyadooda horumariya guusha caafimaadka, waxbarashada iyo dhaqaalaha iyo dadaalka hoggaaminta. Adeegga Qoyska Soomaaliga (Somali Family Service) waxaa u muuqda tayo wanaagsan nolosha Soomaalida iyo dadka kale ee ka soo jeeda Afrikada Bari ee San Diego. Aragtideeda waxaa lagu gaaray brograamyada waxbarashada ee xoogga saara xirfadaha hoggaaminta, aqoonta maaliyadda, waxbarashada caafimaadka iyo qorsheynta shaqada. Intaas kaddib, hawlaha SFS waxay fulliyaan fursadaha sinaanta iyo waxay soo saaraan garasho badan iyo isgaarsiin ka dhexeyso Soomaalida iyo bulshada kale ee ka soo jeeda Afrikada Bari.

Taakuleynta iyo Horumarinta Imaadeyaasha Cusub (Newcomers Support and Development) (NSD): Kaddib marka la dhisay sannadkii 2017, Taakuleynta iyo Horumarinta Imaadaha Cusub (Newcomers Support and Development) kaasoo ah urur soo baxay aan raadinin fa'iido, wuxuu ka shaqeyaa in uu taageero imaadaha cusub xagga horumarinta qorshooyinka nolosha in ka badan baahida aasaasiga, waxay adeegsataa dhaqan gelin iyo midaynta adeegyada, ka-qeybgalka bulshada iyo madaniga iyo taakuleynta ganacsiga yar iyo horumarinta. Agaasimaha ururka iyo aasaasaha, Mohamed Tuama wuxuu noqday tababaraha Machadka Hoggaaminta Dagganaha (Resident Leadership Academy), wuxuu qaatay shahaadada sannadkii 2013, kaddibna waxaa dhawaan loo aqoonsaday in uu ka mid yahay Abaal Marrinta Halyeeyada Deegaanka Dagmada Daryeelka Caafimaadka Grossmont (Grossmont Healthcare District's Local Hero Awardees) taasoo ugu wacan shaqada ururkiisa ka qabtay bulshada Ciraaqiga. Tuama, oo ah muwaadin Mareykan cusub, wuxuu qaxootiga cusub ee yimida ku kaalmeyaa in ay fahmaan suuqa shaqada, hiddaha iyo siistemyada daryeelka caafimaadka, iyo sidoo kale waxay dadka ku kaalmeyaan in ay gaaraan go'aano caafimaadka u roon xagga jimicsiga iyo xulashooyinka raashinka. Muddo aad u gaaban gudaheeda, NSD waxay jidad u abuurtay Ciraaqiga deegaanka iyo qaxootiga Suuriya in ay si wanaagsan ula xariiraan saraakiisha Magaalada, qeybaha waaxda, ururada deegaanka aan fa'iidada ku shaqeynin iyo kooxaha madaniga si loo horumariyo xariirka hiddaha ee dhex maro, iskaashiga iyo tayada nolosha. Ururkaan dhallinta yar ee ku jira marxaladaha hore, wuxuu qaban doonaa shaqo ka sii wanaagsan.

DIYAARINTA IYO LOJISTIKADA

Sida caadada CHIP tahay, waa la dhamaystiray diyaarinta fullinta RLAyada marka la soo aruuriyay macluumaadka ku saabsan bulshada, meesha RLAyada lagu qaban doono. CHIP waxay cilmi baaris ku samaysaa qeybo kala duwan, sida balse kuma eka: dadka loogu talagalay, ururada ku saleysan bulshada ee mattala dadka, hiddaha, luqadaha ku dadban sida suurtoogalka ah, iyo waxyaabo kale oo laga yaabo in loo baahan yahay si loo taageero dhamaystirka RLAyada bulshadahaan. CHIP waxay si gaar ah u tixgelisay iyo waxay fullisay cilmi baaris ka badan inta caadiga ah si loo bilaabo loona bixiyo RLAyadaan bacdamaa in lala shaqeeyo dadka qaxootiga ahayd fursad cusub oo gaar ah. Waxaa la adeegsaday iskuduwidda (baahida loo qabo tarjamada qoraalka iyo tarjamada hadalka) iyo la qabsiga aqoonta iyo nooca waxbarashada si loo hubiyo in waxa ku jira manhajka la siiyo ka-qeybgaleyaasha qaxootiga sida loogu talagalay.

Gobolka Bari

Shaqaalaha CHIP waxay la kulmeen Agaasimaha Taakuleynta iyo Horumarinta Imaadeyaasha Cusub (Newcomers Support and Development) (NSD), Mohamed Tuama si looga hadlo kaddibna go'aan looga gaaro habka loo abaaro hiddaha iyo luqadda dadka ku sugan Gobolka Bari. Labada koox ee ka qeybgeli doono RLAyada waa kooxaha kubadda cagta, kuwaasoo ka kooban ragga Ciraaq ee u dhexeeyo 16 ilaa 30 sanno, iyo koox ka tirsan dhallinta Ciraaq iyo qaangaarka Suuriya oo u dhexeeyo 15 ilaa 30 sanno. Goobta loogu talagalay tababarka waxay ahayd xafiiska NSD, kaasoo ay ogsoon yahiin iyo tagi karaan kooxaha.

CHIP, maaliyad ahaan, awood uma yeelanin in ay fududeeyso isbaddal iyo tarjamo buuxda oo laga sameeyo kullanka kasta RLA, si maadada kullanka RLA loo siiyo NSD, tababarka ka hor, si loo hubiyo in shaqaalaha la socdaan iyo in ay fahamsan yahiin macluumaadka laga yaabo in looga hadlay kullamada RLA. Shaqaalaha NSD waxay bixiyeen tarjamada luqadda hadba sida loogu baahdo waqtiga kullamada iyo, mar kale, marka la soo xero kullanka kasta, barashada soo koobidda waxaa loo iftiimiyay dadka ka soo qeybgalay iyo waxaa la bixiyay fursad lagu weydiyo caddeynta su'aalaha.

Gobolka Dhexe

Shaqaalaha CHIP waxay la kulmeen Agaasimaha Fullinta SFS - Ahmed Sahid iyo shaqaalaha si ay u qorsheyaan habka loo abaaro aqoonta la siiyo dadka - SFS - kooxda dhallinta LION Somali ee lagu magacaabo, Hoggaamiyeyaasha Xaafadda (Leaders in Our Neighborhood) (LION). Brograamka, kaasoo adeegsada kullamada waxbarashada iyo hawlaha nasashada, wuxuu dadka loogu talagalay, dhallinta Afrikada Bari, siiyaa xirfadaha loo baahan yahay si ay u noqdaan kuwo isku filan, isku kalsoon oo noqda jiil mas'uul ah. Brograamka wuxuu xoogga saaraa xoojinta dhallinta da'doodu tahay 13-18. LION wuxuu ku hoggaamiyaa hawlaha wanaagsan, waxaa loo adeegsadaa hawlaha waxbarashada iyo nasashada ee horumariya aqoonta iyo koriimada. Ujeedada LION waa in la horumariyo awoodda iyo dagganaashada bulshada Afrikada Bari marka la abuurto dhallin isku filan, waxbartay, oo ka tirsan bulshada. SFS waxay ka shaqeysay in ay si dhamaystiran LION u geliso brograam waxbara, dhiirigeliya, iyo qaab u yeela dhallinta Afrikada Bari si ay u noqdaan hoggaamiyeyaasha xiga ee xaafadhooda. Si loo gaaro tani, SFS waxay xoogga saartay in ay LION ka dhigto brograam aan ku halaneen farxadda iyo nasashada keliya, balse sidoo kale ka dhiga LION brograam hiddo ahaan ku habboon iyo munaasab u ah dhallinta Afrikada Bari ee ku nool Mareykanka.

In kooxda LION lala safo RLA waxay ahayd fikradda ugu wanaagsan xagga wada shaqeynta iyo bacdamaa ilaha aad u koobnayeen si loo fududeeyo tarjamada qoraalka ama tarjamada hadalka dhamaystiran kullanka kasta RLA, habka lagu heshiyay wuxuu ahaa in tilmaanta RLA lagu bixiyo luqadda Ingiriisiga lana siiyo dhallin si wanaagsan u fahamsan luqadda Ingiriisiga, hase ahaatee in la helo shaqaalaha SFS oo tarjumi kara marka loo baahdo, kaddibna waxaan ogolaanay waqtiyo iyo meelo loo baahan yahay in lagu caddeeyo luqadda Soomaalida si loo fududeeyo fahamka arrimaha caafimaadka dadweynaha ee adag iyo mowduucyada lagu sharaxay RLA.

RLA kasta waxay ka kooban tahay qeybo muhiim ah/bartilmaameedyo lagu gaaro tababarka iyo kullamadii hore; natiijada ugu dambeyso waa koox habaysan iyo aqoon u leh hoggaaminta dagganaha. Qeybaha muhiimka ah RLA, kuwaasoo lagu sifeeyo Bogga 7aad, waa aragtida caadiga, taasoo ka dhallatay qorshaha lagu dhaqaaqo, ahaymiyadda Mashruuca Horumarinta Bulshada (Community Improvement Project), iyo kaalinta iyo mas'uuliyadda kooxda oo cadcad.

QEYBAHA RLA

Aragtida

Habka RLA wuxuu hoggaamiyayaasha daggan siiyaa fursada ay aragti caadi ah u soo saaraan bulshadooda taasoo sharaf u ah in ay la wadaagaan kana noqdaan mas'uul. Aragtida waxay noqon doontaa bartilmaameedka doodooda taasoo tixgelisa dhamaan bulshadooda, ma aha keliya kuwa ka qeybgala RLA. U doodidda horumarka bulshadaada sida hoggaamiyayaasha dagganaha waxay wax tar leedahay marka ay jirto aragti cad oo wax looga qabto arrimaha ay bulshada la wadaagto

Horumarinta Mashruuca Horumarinta Bulshada (Community Improvement Project Development) iyo Qorshaha Fullinta (Action Plan)

Ka qeybgaleyaasha RLA waxay aqoonsadeen Mashaariicda Horumarinta Bulshada (Community Improvement Projects) (CIPs), kuwaasoo ah mashaariic ay soo saareen iyo fulliyeen hoggaamiyayaasha daggan, kaddibna abuureen qorshaha lagu dhaqaaqo si loo kaalmeeyo hoggaaminta looguna kaalmeeyo in ay gaaraan ujeedooyinkooda CIP. Si loo habsado horumarinta CIP wanaagsan, waxaa waajib ah in fikradaha iyo xalka loo soo bandhigo bulshada iyo kuwa daneeya ahaadaan kuwo cadcad, la taaban karo, la fahmi karo, laguna hubiyo xog laga helo tayo iyo tiro iyo macluumaadka. In la yeesho qorshe cadcad oo wax lagu qabto, kaalin la caddeyay, iyo mas'uuliyaddaha waxay lagama maarmaan u tahay in la gaaro guusha bulshada.

Fullinta Mashruuca Horumarinta Bulshada

Fullinta CIP waxay dhaqaaqisaa aragtida iyo ficilka. Ujeedada CIP waa in bulshadaha ay quseeyso laga gaaro isbaddal la arki karo, la taaban karo, oo dhab ah, taasoo ku saleysan mashaariicda la aqoonsaday lana caddeyay inta ay socotay hawsha soo saarka. Waxaa muhiim ah in la xasuusto in RLA loogu talagalay in lagu taageero in fikradaha leysugu keeno saddax ilaa shan himilooyin iyo ujeedooyin. Ka-qeybgaleyaasha waxay aqoonsadaan falalka lagu abaabulo kuwa daneeya bulshada iyo taageerada la siiyo mashruuca, taasoo ugu dambayn u horseeda in wax la qabto.

Kaalinta iyo Mas'uuliyadda Saaran Kooxda

Adkeynta kaalinta habaysan iyo mas'uuliyadda ka jirta gudaha koox kasta tababarka RLA waa mid ka mid ah qeybaha furaha hawsha RLA. Waxaa laga helaa nidaamka lagu kaalmeeyo kooxda in ay ku guuleystaan abuurista, fullinta, iyo hirgelinta aragtidooda, qorshooyinkooda waxqabadka, iyo CIPyada. Mid kasta oo ka mid ah kaalinta iyo mas'uuliyadda kooxda RLA waxay ku qoran tahay dhanka midig.



HOGGAAMIYAHA KOOXDA

- Wuxuu mattalaa kooxda RLA oo idil



AF HAYEENKA

- Wuxuu la xariira meediyaha, saraakiisha la doortay, iyo shaqaalaha daneeya/wakiilada bulshada



ABAABULAHA

- Wuxuu macluumaad la qeybsadaa qeybaha bulshada kala duwan, iyo wuxuu kiciyaa arrimaha bulshada.



DIWAAN GELIYAHA

- Wuxuu la socdaa arrimaha bulshada, wuxuu adeegsadaa sawiro, kor ka eegid, iyo warbixin



ARUURIYAHA XOGTA

- Wuxuu raadiyaa ilaha xogta si uu u caddeeyo arrimaha bulshada



ISKUDUWAHA BULSHADA

- Wuxuu taageeraa hawlaha, munaasabadaha, iyo shaqada loo qabto bulshada

RLA #1- GOBOLKA BARI

CHIP + NSD | El Cajon, CA

HABKA WAXBARASHADA DHALLINTA CIRAAQ RLA

- **La Kullan & Salaan (Meet & Greet)** – Jimco 2.17.17 (5am-7pm)
- **RLA Kullamada 1-2** – Talaado 2.21.17 (5am-8pm)
- **RLA Kullamada 3, 4** – Jimco 2.24.17 (5am-8pm)
- **RLA Kullamada 5, 6** – Talaado 2.28.17 (5am-8pm)
- **RLA Kullamada 7-10** – 3.3.17 (5am-8pm)

**Dhamaan waxbarashada/tababarka waxaa lagu qabtay xafiisyada NSD – 165 E.Main Street #C, El Cajon, CA 92020*

Tababarka kowaad ee la siiyay Qaxootiga Gobolka Bari RLA (East Region Refugee RLA) waxaa lala fulliyay kooxda kubadda cagta dhallinta Ciraaq iyo tababareyaashooda ka socda Magaalada El Cajon muddo shan todobaad, laga bilaabo Febraayo ilaa Maarso 2017. Kooxda waa isu timid kaddibna waxay aqoonsatay baahida loo qabo fursadaha dheeraadka ah xagga jimicsiga bulshadooda. Gaar ahaan, la'aanta barxadda cayaaraha kubadda saacadaha fiidnimada. Tiro ka kooban toban iyo todobo ka-qeybgaleyaal ayaa ka qalin jebiyay kaddibna bilaabay CIPyada si loo kordhiyo jimicsiga la siiyo kooxaha dhallinta kubadda cagta ee beeraha magaalada El Cajon.

ARRIMAHA BULSHADA KA QEYBGALEYAASHA RLA

- Baahida loo qabo in la horumariyo brograamyada luqadda Ingiriisiga El Cajon
- Baahida loo qabo in la kordhiyo tirada meelaha ka-qeybgalka jimicsiga
- Baahida loo qabo barxado badan iyo beerta; saamiga beerta la heli karo iyo tirada dadka El Cajon ma aha mid siman
- Baahida loo qabo in iftiin badan lagu shido beerta si dadka daggan iyo dhallinta loogu ogolaado in ay kubadda cagta ku cayaaraan marka ay tahay mugdi
- In kooxaha kubadda cagta loo ogolaado in ay ku cayaaraan beerta habeenkii
- In la hagaajiyo dhismaha meelaha lagu socdo Magaalada El Cajon
- In la horumariyo wadajirka ka dhexeeyo hiddaha iyo xariirka ka dhexeeyo kooxaha jinsiyadaha kala duwan ee El Cajon
- In dadka laga joojiyo in aysan sigaar ku cabbin beeraha khaas ahaan meelaha u dhaw iyo/ama agagaarka caruurta ku cayaarto beeraha
- Qorshaha wanaagsan ee loo sameyay dhallinta jirta 18 sanno ama ka yar hase ahaatee dhab ahaan ma jiro wax loogu talagalay dhallinta u dhexeysa 18-25 sanno

TIRADA DADKA

16

ku qoran

17


qalin jebiyay

100% lab




Waddanka Ay Asal Ahaan u Dhasheen: Ciraaq

Da'da ka qeybgalay marka loo fiiriyo sannadka



Luqadaha lagu hadlo



Ka qeybgaleyaasha qaar waxay ku hadlaan in ka badan hal luqad



MASHRUUCA HORUMARINTA BULSHADA

- In wakiilka ku dhaqaaqo talaabadaha loo baahan yahay si uu ugu biiro Guddiga Beerta iyo Nasashada Magaalada El Cajon (El Cajon Park and Recreation Council) sida xubin ka tirsan Guddiga Fullinta (Executive Member).
- In iskaashi lala sameeyo Beerta iyo Nasashada Magaalada El Cajon (El Cajon Park and Recreation) loona adeegso iskaa wax u qabso
- In lala xariiro Beeraha iyo Nasashada Magaalada El Cajon (City of El Cajon Parks and Recreation), si loo ogaado fursadaha suurto galka ah loona kordhiyo hawlaha kubadda cagta ee lagu cayaaro beeraha El Cajon

NATIJADA LA RABO

Kooxaha iyo ururada kubadda cagta waxaa rasmi ahaan loo ogol yahay in ay galaan beeraha El Cajon fiidnamadii muddo saacado.

WAXYAABAHA LA GAARAY

- Bishii Febraayo 2017, kooxda RLA waxay bilowday in ay soo aruuriso macluumaad iyo in ay qaado talaabooyin si loogu ogolaado si rasmi ah Guddiga La-Tallinta Beeraha iyo Nasashada El Cajon (El Cajon Parks and Recreation Advisory Council). Kooxda waxay u baan tahay in ay la kullanto sharuudo gaar ah si ay uga mid noqoto Guddiga; waxay bilaabeen in ay raacaan talaabadaha lagula kulmo sharuudaha. *Xasuusin:* Hawsha ogolaashada Guddiga waxay qaadataa ugu yaraan 1 sanno.
- Bishii Maajo 20, 2017, ka-qeybgaleyaasha RLA waxay iskaa wax u qabso ugu adeegeen "America on Main Street", munaasabo ay soo abaabushay Waaxda Beeraha iyo Nasashada El Cajon (El Cajon Parks and Recreation Department) si loo abuuro iskaashi xooggan oo lala sameeyo Magaalada. Dadka iskaa wax u qabso ku shaqeeyo waxay kaalmo ka geysteen iskuduwidda munaasabada, miiska macluumaadka, qeybinta xayaysiinta, iyo nadaafadda munaasabadda kaddib.
- Ka-qeybgaleyaasha RLA, iyo Creative Labs¹ waxay soo saareen fiidiyow si ay isu muujiyaan iyo si ay u muujiyaan waxa ay rabaan si ay u kordhiyaan fursadaha jimicsiga loogu talagalay dhallinta iyo qaangaarka El Cajon. Fiidiyowga wuxuu kaloo iftiimiyay u doodidda iyo dadaalka dhismaha bulshada Taageerada iyo Horumarinta Imaadaha Cusub (Newcomers Support and Development), iskaashi muhiim u ah mashruucaan RLA.

RLA #1 GOBOLKA BARI

Qorsheynta iyo Qorshaha Fullinta Mashruuca Horumarinta Bulshada

Aragtida

Waxaa noo muuqda bulsho sare oo qurxoon, nadiif ah, ammaan ah, habeynsan, sharaf iyo aqoon leh.

HIMILADA/UJEEEDADA

Waxaan rabnaa El Cajon ammaan ah oo horumar gaarta halkaas ay dhallinta iyo qaangaarka bulshada ka heli karaan fursado badan oo la xariira jimicsiga.

QORSHAHA WAXQABADKA RLA

JADWALKA



Hawlaha	Iskaashiga Suurtogalka ah	Maalgelinta Suurtogalka ah Fursadaha	Natiijadaha la Rabo	Isgaarsiinta/ Fursadaha Meediyaha
In lala shaqeeyo Magaalada Waaxyada iyo Shaqaalaha In lagu biiro Guddiga Nasashada Magaalada El Cajon sida xubin ka tirsan Fullinta In iskaashi lala sameeyo Beeraha iyo Nasashada Magaalada El Cajon loona adeegso iskaa wax qabso Kala shaqee In lala shaqeeyo Beeraha iyo Nasashada Magaalada El Cajon si loo ogaado tafaasiisha waxa suurtoogalka u si loo kordhiyo fursadaha cayaaraha kubadda cagta lagu qabto beeraha El Cajon (tusaale Kennedy Park, Wells Parks)	NSD El Cajon Collaborative Kooxda Kubadda Cagta Bulshada Ciraag CASA, Inc. Kaniisadda Meridian Baptist Masjidka (Masaajidyada) Milkiileyaasha Ganacsiga Deegaanka CHIP/RLA Magaalada El Cajon - Xubnaha Guddiga La-Tallinta Boliiska HHSA – East Region	Maalgelinta-Deeqda Magaalada El Cajon - Maaliyadda Deeqda Horumarinta Bulshada Dadaalka qaaraanka heerka dadweynaha (tusaale iibinta raashinka guriga, dhaqidda baabuurta) Dagmada Daryeelka Caafimaadka Grassmont (Grossmont Healthcare) Dagmada El Cajon Collaborative Qolka Ganacsiga Dagmada Bari (East County Chamber of Commerce) Deeq Bixiyeyaasha Gaarka Ururada samafalka ee xoogga saara caafimaadka	In saacadaha dambe, Beeraha El Cajon ku soo bataan kubadda cagta, taasoo ah wax la ogol yahay In beeraha El Cajon ahadaan nadiif, soonaa dhaweyaan qoyska In dad badan ku xariiraan gudaha Beeraha El Cajon In Beeraha El Cajon ahaadaan meel aysan dadka ka cabsanin in ay tagaan, kana walwalin guri laaweyaasha. In Beeraha El Cajon ahaadaan meel ka madax banaan qiiqa In caruurta ku cayaaraan gudaha Beerta iyaga oo aan cabsanin In bulshada El Cajon ahaato meel ammaan ah, dadkana ka qeybgalaan jimicsi badan	San Diego Tribune City Beat East County Gazette Raadiyaha KPBS iyo TV Shabakada Telefishanka Dagmada East County Herald East County Magazine East County Californian

RLA #2 GOBOLKA BARI

CHIP+NSD | El Cajon

HABKA WAXBARASHADA DHALLINTA

IRAQ IYO SYRIA RLA

- **La Kullan iyo Salaan** – Qamiis 5.11.17 (5pm-7pm)
- **RLA Kullanka 1-3** – Sabti 5.13.17 (3:30pm-6pm)
- **RLA Kullanka 4-6** – Talaado 5.16.17 (3:30pm-6pm)
- **RLA Kullanka 7-10** – Arbaco 5.24.17 (4:30pm-6:30pm)

*Dhamaan waxbarashada/tababarka waxaa lagu qabtay xafiisyada NSD – 165 E. Main Street #C, El Cajon, CA 92020

Tababarka labaad ee Qaxootiga Gobolka Bari RLA (East Region Refugee RLA) waxaa lala fulliyay koox kale oo cayaarta kubadda cagta kana socota Magaalada El Cajon muddo saddax todobaad bishii Maajo 2017. Kooxda waa isu timid kaddibna waxay aqoonsatay baahida loo qabo fursadaha horumarinta ammaanka bulshadooda, gaar ahaan si loo horumariyo ammaanka Wells Park ee ku yaal El Cajon. Tiro ka kooban toban iyo lex ka-qeybgaleyaal ayaa ka qalin jebiyay kaddibna bilaabay CPyada si loo kordhiyo ammaanka dhallinta Wells Park.

ARRIMAHA BULSHADA KA QEYBGALEYAASHA RLA

- Guri laaweyaal badan oo carqaladeeya dadka Wells Park, taasoo beerta ka dhigta meel aan ammaan ahayn.
- Meelaha qaar bulshada aad yay mugdi u tahay, waxaa loo baahan yahay iftiin badan si loo dareemo ammaan
- In badan oo ka tirsan dumarka dhallinta yar waxay soo sheegeen in aysan ammaan qabin (in ay cabsi iyo walwal qabaan) marka ay socdaan gudaha bulshada taasoo ugu wacan faalada ay rakaabka saaran baabuurta socota ka bixiyaan iyaga.
- El Cajon waxay yeelan kartaa dhinacyo balaaran oo lagu socdo iyo ammaan ah
- Meelaha qaar ee ka tirsan El Cajon waxaa ku badan qashin ku daadsan jidadka iyo meelaha dadweynaha.

TIRADA DADKA


18 ku qoran **16** qalin jebiyay

2 Lab **16 Dhedig**


Waddanka
Asalka:

17 Ciraaq
1 Syria

Da'da ka qeybgalaha marka loo fiiriyo sannadka



Luqadaha lagu hadlo



Ka qeybgaleyaasha qaar waxay ku hadlaan in ka badan hal luqad



MASHRUUCA HORUMARINTA BULSHADA

- Aruurinta Xogta: Wells Park oo laga fulliyo qiimeynta ammaanka Ka-Hortagga Dambiyada Loo Adeegsado Handasada Deegaanka (Conduct Crime Prevention Through Environmental Design (CPTED) (aruurinta xogta) si loo xaqiijiyo arrimaha kooxda la kullantay ee ku saabsan Beerta iyo ka dooda xalka (tusaale ahaan jaridda dhirta ilaa 2.5' si looga hortago meelo lagu dhuunto oo laga fulliyo hawlaha sharci darrada iyo si loo kaalmeeyo kormeerka bulshada
- Horumarinta iftiinka iyo dhismaha meelaha lagu socdo ee ku wareegsan Wells Park
- Iskaashi lala sameeyo Waaxda Beeraha iyo Nasashada Magaalada El Cajon (City of El Cajon Parks and Recreation Department) lana adeegsado iskaa wax u qabso
- Taageerada la siiyo isbaheysiyada kala duwan ee sidoo kara rabta in Wells Park soo dhaweyso qoysaska
- Sahanka sida ay suurtoagal u tahay in carwada hiddaha laga fulliyo goobta beerta si loo bandhigo hiddaha kala duwan ee ka jira El Cajon (tusaale ahaan dheesha, muusikada, raashinka, ilaha, iibiyayaasha)
- La horumariyo ammaanka iyo soo dhaweynta-qoyska Wells Park

NATIJADA LA RABO

- In kooxaha kubadda cagta iyo ururada si rasmi ah u isticmaalaan beeraha ku yaal El Cajon muudo fidsan fiidnimadii.

WAXYAABAHA LA GAARAY

- Bishii Luulyo 17, 2016, u doodeyaasha waxay la kulmeen Agaasimaha Adeegga Nasashada Magaalada El Cajon, Fran Carson, waxay la wadaageen aragtidda ku saabsan qiimeynta beeraha iyo tallooyinkooda ku saabsan horumarinta ammaanka Wells Park.
- Mr. Carson iyo Magaalada El Cajon waxay si firfircoon u sahmiyaan dhowr siyaabo si loo sugo ammaanka jawiga goobta. Magaalada waxay albaab gelin doontaa meesha laga soo galo barxadda baabuurta la dhigto si dibadda loogu haayo baabuurta iyo dadka marka beerta xeran tahay habeenkii, iyo waxay rinji gaduudan marin doontaa dhowr meel oo la dhigto baabuurta si loo yareeyo tirada dadka ku nool baabuurtooda in aysan baabuurta dhiganin agagaarka kaniisadda.
- Beeraha iyo Nasashada waxay ku hawlan yahiin dhiirigelinta shirka wadajirka ee ka dhexeeyo NSD iyo Meridian Baptist Church si loo saaro brograam la socodsiiin karo, muddada dheer, iyo horumarinta ammaanka bulshada si dambiyada iyo hawlaha sharci darrada looga sii jeediyo agagaarka iyo meelaha u dhaw kaniisadda. Waxay jecel yahiin in kaniisadda qaadatao brograamkaan sida mid ay iyaga leeyahiin, hase ahaatee waxay muujiyeen in ay jecel yahiin shaqada muddada dheer ee lala shaqeeyo NSD.

RLA #2 GOBOLKA BARI

Qorsheynta iyo Qorshaha Fullinta
Mashruuca Horumarinta Bulshada

Aragtida


Waxaa noo muuqda bulsho laga helo meelo wanaagsan, ammaan ah, nadiif, hawlo badan ka socdaan, iftiin, iyo caws wanaagsan gudaha beeraha iyo meelaha dadweynaha looguna talagalay dhamaan isboortiga.

HIMILADA/UJEEEDADA

Si loo sugo ammaanka Wells Park loogana dhigo meel soo dhaweyso qoyska.

QORSHAHA WAXQABADKA RLA

JADWALKA



Hawlaha	Iskaashiga Suurtogalka ah	Fursadaha Maalgelinta Suurtogalka ah	Natiijadaha la Rabo	Isgaarsiinta/ Fursadaha Meediyaha
La shaqeynta Waaxyada Magaalada iyo Shaqaalaha Aruurinta Xogta: Fullinta qiimeynta ammaanka OPTED Wells Park. Arrimaha iminka jira/ arrimaha in loo gudbiyo Guddiga Magaalada + shaqaalaha Beerta iyo Nasashada iyo soo jeedinta xal kharash jaban (tusaale ahaan jaridda dhirta ilaa 2.5') Xassilinta baabuurta Wells Park si dadka socda u helaan ammaan Hagajinta nalalka iyo socodka dhismaha agagaarka Wells Park Iskaashiga lala sameeyo Beeraha iyo Nasashada El Cajon loona adeegsado iskaa wax u qabso. In la helo taageerada xulafo kala duwan oo raba in Wells Parka ahaato meel in badan soo dhaweyso qoyska	NSD Kooxda Kubadda Bulshada Ciraaci Machadaha Hoggaaminta Dagganaha Carabiga #1 & #2 El Cajon Collaborative Machadka Hoggaaminta Daganaha El Cajon Creative Lab 1 Kaniisadaha / Ururada Madaniga Kooxaha Ilaalinta Xaafadda Ururada Xaafadda Kaniisadda Meridian Baptist	Dadaalka qaaraanka dadweynaha (iibinta raashinka guriga, dhaqidda baabuurta) Magaalada El Cajon - Maaliyadda Deeqda Horumaringa Bulshada The Californian Endowment Price Charities Ururada samofalka ka shaqeeyo caafimaadka	In dad badan ku farxaan Wells Park In dad badan isticmaalaan Wells Park In la yareeyo guri laaweyaasha (In adeegyo la siiyo guuri laawaha!) Wells Park iyo meelaha kale In gudaha lagu dhsio meel kubadda cagta lagu cayaaro ay bulshada isticmaasho In bulshada Wells Park loo dhiso barxad cusub oo lagu cayaaro kubadda cagta	Raadiyaha iyo TV_ga KPBS San Diego Union Tribune – South + Qeybta Dagmada Bari ShabakadaTelefishan ka Dagmada Codka San Diego (Voice of San Diego) Shirkadaha Kableka Shannalada Dadweynaha East County News East County Californian East County Herald East County Magazzine Creative Lab 1

Hawlaha	Iskaashiga Suurtogalka ah	Maalgelinta Suurtogalka ah Fursadaha	Natiijadaha la Rabo	<u>Isgaarsiinta/</u> Fursadaha Meediyaha
Sahanka suurtoqalka fullinta Carwada Hiddaha (Cultural Fair) taasoo iftiimisa hiddaha Bariga Dhexe lagana dhigo goobta beerta (tusaale dheel, muusiko, raashin, ilo, iibiyeyaal kale Xulafo lala sameeyo dadka/Ururada qaba himilooyin la mid ahsi loo abuur xulufu kala duwan Lala kulmo kaddibna aragtida iyo ujeedooyinka mashruuca lala qeybsado: -Kaniisadda Meridian Baptist -Masaajidyada -El Cajon Collaborative -Creative Lab 1 - CASA, Inc. -HHSA East Region Staff -Live Well San Diego – Kooxda East Region Leadership	HHSA East Region Staff (Shaqaalaha Gobolka Bari) <i>Live Well San Diego</i> – East Region Leadership Team Participants (Ka-Qeybgaleyaasha Kooxda Hoggaaminta Gobolka Bari) Ururada Abarmanada Kooxaha Waayeeelka (Seniors Groups Apartment complex associations) Bixiyeyaasha xanaanada maalinta ku saleysan guriga			

RLA #3 GOBOLKA DHEXE

CHIP+SFS | City Heights

HABKA WAXBARASHADA DHALLINTA SOOMAALIDA RLA (SOMALI YOUTH RLA EDUCATION PROCESS)

- **La Kullan iyo Salaan (Meet & Greet)**– Arbaco 4.5.17 (4pm-6pm)
- **RLA Kullamada 1-3** – Arbaco 4.12.17 (4pm-6pm)
- **RLA Kullamada 4-6** – Arbaco 4.19.17 (4pm-6pm)
- **RLA Kullamada 7,8** – Arbaco 4.26.17 (4pm-6pm)
- **RLA Kullamada 9,10** – Arbaco 5.3.17 (4pm-6pm)

**Dhamaan waxbarashada/tababarka waxaa lagu qabtay Xafiisyada SFS
— 6035 University Avenue #6, San Diego, CA 92115*

Tababarka saddaxaad ee Qaxootiga Gobolka Bari RLA (East Region Refugee RLA) waxaa lagu qabtay Gobolka Dhexe (Central Region), waxaa lala qabtay kooxda hoggaaminta Qaxootiga Afrikada Bari (East African Refugee) ee ka socota City Heights muddo shan todobaad laga bilaabo Abriil ilaa Maajo 2017. Kooxda waa isu timid kaddibna waxay aqoonsatay baahida loo qabo horumarinta ammaanka iyo fursadaha ka jira Colina Park ee City Heights. Tiro ka kooban labaatan iyo lex ka-qeybgaleyaal ayaa ka qalin jebiyay kaddibna bilaabay CIPyada si loo kordhiyo ammaanka dhallinta qaxootiga iyo qoysaskooda Colina Park.

ARRIMAHA BULSHADA KA QEYBGALEYAASHA RLA

- Xaaladaha jidka City Heights waxay u baahan yahiin dayactir, waxaa ku badan gododka
- Waxaa jira baabuur badan xaafadda Kulliyadda, taasoo ah xaafad ka taal gudaha Gobolka Dhexe halkaas ay ku nool yahiin ka-qeybgaleyaal badan oo tagta dugsiga.
- Nadaafadda guud ee City Heights iyo agagaarka ku wareegsan waxaa lagu horumarin karaa fuustooyin dheeraad ah oo lagu shubo qashinka, xaaqidda jidadka iyo bulshada oo qaadda qashinka waaweyn.
- Waxaa loo arkaa in inta badan beeraha deegaanka in aysan ammaan ahayn, sida Oak Park, Martin Luther King Park, iyo Colina Park. Ka-qeybgaleyaasha waxay dareensan yahiin in beeraha ay ku soo bateen hawlaha halista (sida - qamrada lagu cabbo

fagaaraha, mukhaadaraadka sharci darrada) oo dareensiya ammaan darro.

TIRADA DADKA

26


ku qoran

26


qalin jebiyay

12 Lab 9 Dhedig 5 Lama aqoonsanin


Waddanka Asalka:



Da'da ka qeybgala marka loo fiiriyo sannadka



Luqadaha lagu hadlo



Ka qeybgaleyaasha qaar waxay ku hadlaan in ka badan hal luqad



MASHRUUCA HORUMARINTA BULSHADA

- Kaalmada Waaxda Adeegyada Iskaa Wax u Qabso ee Magaalada San Diego kaddib, adeegso Ka Hortagga Dambiga Qorshaha Deegaanka (Crime Prevention Through Environmental Design (CPTED)-ahamiyadda amaanka si loo hagaajiyo simidda dhulka loogana saaro meelaha lagu dhuunta oo ah meelaha ugu horeeyo ee la xariiro dabeecadaha halista/aan la rabin ee lagu arkay Colina Park
 - Wax ka qabashada xassilinta baabuurta (buurta gaaban ee lagu dadbo jidka, rinjiga la marriyo isgoysyada, wareegyada, iwm.) si loo hakkiyo baabuurta yaryar iyo baabuurta meelaha u dhaw iyo agagaarka Colina Park
 - Raadinta macluumaadka ku saabsan tafaasiisha Adeegso Brograamka A-Park (A-Park Program) ee Magaalada San Diego, Waaxda Iskaa Wax u Qabso (Volunteer Services Department)
 - Fursadaha suuqa beeraleyda waxaad kala hadashaa kooxaha kale ee daneeya
 - U doodidda horumarinta beerta, qurxinta, iyo hagaajinta Magaalada San Diego, Waaxda Qorsheynta (Planning Department)
- Waaxda

NATIJADA LA RABO

In la yareeyo dhibaatooyinka ammaanka ee ka jira Colina Park lana adeegsado simidda dhulka

WAXYAABAHA LA GAARAY

- RLA_daan waxaa la soo gabogabeyay dhamaadka soo saarka warbixintaan, waxayna iminka bilaabeen in ay fiiriyaan sida loo bilaabo wax ka qabashada qorshooyinkooda sidaas darteed ma jirto waxqabad la soo jeediyo waqtigaan.

RLA #3 GOBOLKA DHEXE

Qorsheynta iyo Qorshaha Fullinta
Mashruuca Horumarinta Bulshada

Aragtida

Waxaan noo muuqda bulsho ammaan ah, wax soo saarta, nadiif ah, cagaaran, kala duwan, farxad iyo qalab badan, barxado wanaagsan iyo hawlo badan.

JADWALKA

HIMILADA/UJEEEDADA

Abriil 2017

Abriil 2018

Si loo hagaajiyo ammaanka Colina Park iyo agagaarka.

QORSHAHA WAXQABADKA RLA

Hawlah	Iskaashiga Suurtogalka ah	Fursadaha Maalgelinta Suurtogalka ah	Natiijadaha la Rabo	Isgaarsiinta/Fursadaha Meediyaha
La shaqeynta Waaxyada iyo Shaqaalaha Magaalada	Adeegga Qoyska Soomaalida (Somali Family Service) SD, Inc. (LION)	Qaaraanka deeqda si loo taageero wada hadalada golaha ee ku saabsan waxbarashada dadweynaha	In Colina Park yeelato sumcad wanaagsan	City Heights Live
Hirgelinta ahamiyadda ammaanka OPTED si loo hagaajiyo simidda dhulka loona tirtiro meelaha lagu dhuunta Colina Park (tusaale Magaalada San Diego, Adeegyada Iskaa Wax u Qabso)	Mid-City CAN Dhismaha Bulshado Caafimaad Qaba oo laga dhiso City Heights (BHC)	Magaalada San Diego - Maaliyadda Deeqda Horumarinta Bulshada (Community Development Block Grant Funds)	In Colina Park muujisaa deegaan nadiif ah	Azalea Park – Wargeyska Parkster (bil kasta)
Wax ka qabashada baabuurta, xassilinta agagaarka Colina Park si loo dhowro ammaanka socdaha	Kooxda Shaqada Deegaanka BHC (BHC Built Environment Work Team)	Dadaalka qaaraanka dadweynaha (iibinta raashinka guriga, dhaqidda baabuurta	In dad badan ku xariiraan Colina Park	Speak City Heights
U doodidda hagaajinta Park/qurxinta/baddal aadda (tusaale Magaalada San Diego, Waaxda Qorsheynta - Michael Prinz)	Ganacsiga City Heights iyo Ururada Xaafadda	The California Endowment	In Colina Park ahaato meel dadka aysan ka cabsanin in ay tagaan	San Diego Tribune
	Asociación de Liderazgo Comunitario (ALC)	Price Charities	In Colina Park ahaato meel soo dhaweysa qoyska	City Beat
	City Heights CDC	Ganacsiga City Heights iyo Ururka Xaafadda	In Colina Park ahaato meel ka madax banaan cabidda sigaarka	El Latino
	Ururada ka shaqeeyo caafimaadka iyo ammaanka City Heights	Deeq Bixiyeyaasha Gaarka	In caruurta ku cayaaran gudaha Beerta cabsi la'aan.	Akhristaha
	Kaniisadaha / Ururada Madaniga	Ururada samafalka ee ka shaqeeyo caafimaadka	In City Heights ahaato bulsho nadiif ah oo laga helo	Raadiyaha KPBS iyo TV_ga
				ShabakadaTelefishanka Dagmada
				Voice of San Diego (Codka San Diego)
				Shirkadaha Kableka: Shannelka Dadweynaha

Hawlaha	Iskaashiga Suurtogalka ah	Fursadaha Maalgelinta Suurtogalka ah	Natiijadaha la Rabo	Isgaarsiinta/ Baahinta Fursadaha
Qorshaha fullinta oo lala qeybsado wakiilka Magaalada San Diego iyo shaqaaalaha City Heights Kooxaha kale ee daneeyo lagala hadlo fursadaha Farmer's Market iyo Community Gardens ee Colina Park Xulufo lala dhiso dadka/Ururada qaba himilooyin la mid ah si loo dhiso isbaheysi kala duwan: In lala kulmo iskaashiga suurtoogalka aha lala kulmo iyo in lala qeybsado aragtida iyo himilooyinka nasgryyca	EAYO- East African Youth Organization (Ururka Dhallinta Afrikada Bari) YEF- Youth Empowerment Focus (Ahaamiyadda Xoojinta Dhallinta) PANA- Partnership for the Advancement of New Americans (Iskaashiga Horumarinta Mareykanka Cusub Project Aja (Mashruuca Aja) Pro Kids (Dhanka Caruurta) United Women of Africa (Wadajirka Dumarka Afrikaanka) HUDA- Masjid Al Huda (HUDA Community Center) (Xarunta Bulshada HUDA) Milkiileyaasha Ganacsiga Soomaalida @ 50th + Jaamacadda Seniors Groups Apartment Complex Associations (Ururada Kooxaha Waayeelka Abarmanada) Bixiyeyaasha xanaanada maalinta ee ku saleysan guriga	Maaliyadda deeqda lagu taageero wadahalada golaha waxbarashada dadweynaha Magaalada San Diego - Maaliyadda Deeqda Horumarinta Bulshada Dadaalka qaaraanka dadweynaha, (iibinta raashinka guriga, dhaqidda baabuurta) The California Endowment Price Charities Ganacsiga City Heights iyo Ururada Xaafadda Deeq Bixiyeyaasha Gaarka Ururada samafalka ee ka shaqeeyo caafimaadka	In caruurta ku cayaarto Beerta cabsi la'aan In la sugo ammaanka bushada iyo in dadka ka qeybgalaan jimicsi badan jimicsiga In City Heights ahaato meel nadiif ahoo laga helo	

SOO KOOBIDDA SKAANKA DEEGAANKA QAXOOTIGA

Dhamaystirka RLAyada kaddib, qeybta labaad mashruucaan waxay ahayd in la dhamaystiro skaanka deegaanka bulshada qaxootiga Gobolka Bari iyo Dhexe, lana isticmaalo habka falanqeynta SOAR. Ujeedada skaankaan waxay ahayd in la ogaado baahida ay qabto bulshada iyo meesha laga heli karo fursado lagu kor dhiso lana xoojiyo adeegyada la siiyo qaxootiga San Diego. Ka qeybgaleyaasha CHIP iyo RLA waxay ka wada shaqeyeen fullinta xariirinta ka jirta bulsho kasta gudaheeda si loo hubiyo in ay yimaadaan noocyada qaxootiga kala duwan (da'da, waddamada ay asal ahaan ka soo jeedaan, muddada ay joogaan Mareykanka, iwm.); tiro kakooban 52 qaxooti ayaa ka qeybgalay labada wada hadal, 34 Gobolka Bari iyo 18 Gobolka Dhexe. Soo koobidda macluumaadka laga soo aruuriyay wada hadaladaan bulshada waxaa laga helaa bogagga soo socda; macluumaadkaan waxaa lala qeybsan doonaa iskaashatada bulshada iyo kuwa daneeya si ay u wargeliyaan qorshooyinka mustaqbalka ee la xariira adeegyada qaxootiga.

I. Meelaha qofka ku xooggan yahay

Maxay yahiin qaar ka mid ah hantida ugu weyn bulshada qaxootiga, iyo nooca adeegyada ama brograamyada ay adeegsadaan si loogu kaalmeeyo in ay guuleystaan?

- Qaxootiga waxay bulshada u keenaan kala duwanaan, fikrado cusub, aragtida dunida, iyo fursadaha ganacsiga.
- In la leeyahay bulsho jirta oo soo dhaweysa qaxootiga cusub ee yimaada waxay fududeysaa in si sahlan leysu dhexgalo iyo helitaanka adeegyada iyo brograamyada iyaga ku keelmeeya in ay guuleystaan.
- Qaxootiga waxay adeegsadaan adeegyo iyo brograamyada kala duwan oo iyaga ku kaalmeyaa baahidooda sida kaalmada dadweynaha Dagmada (CalFresh, Medi-Cal, CalWORKs, iyo Welfare-to-Work), Wakaaladaha Dajjinta (Resettlement Agencies) iyo Ururada Bulshada ee ku Saleysan Jinsiyadda (Ethnic Based Community Organizations) xagga luqadda iyo tarjamada, waddaniyadda, adeegyada shaqaada, tixraacinta, iyo adeegyada kale ee la xariira bulshada.

II. Fursadaha

Maxaa la hagaajin karaa sida wanaagsan ee loogu adeego iyo wax loogu qabto bulshada qaxootiga si loo habsado in ay ku guuleystaan guryahooda cusub?

- Shaqada, sida kordhinta meeleynta shaqada laga helo ururada deegaanka, fursadaha iskaa wax u qabso iyo tababarka shaqada.

- Aqoonta hiddaha la siiyo xubnaha bulshada, shaqaalaha, iyo loo-shaqeeyaha. La hubiyo in shaqaalaha ku sugan wakaaladaha adeegga bulshada ee u adeegga qaxootiga waxaa ka mid ah shakhsiyaadka ee naftooda ahaa qaxooti; wadaagay waayaha, luqadda iyo hiddaha waa hab wanaagsan oo loogu adeego dadkaan.
- Ilaha Aadanaha (Family Resources) sida dagaalka guriga iyo adeegyada furiinka, waxaa kaloo jirta baahi loo qabo boos leysugu yimaado lagana bixiyo brograamyada dheeraad ah oo la siiyo waayeelka.
- Brograamyada iyo adeegyada qaxootiga aqoonta leh si ay kaalmo uga siiyaan brograamyada shahaadada, xarun taakuleyn iyo hoggaamin siisa si ay maraan siistimka waxbarashada Mareykanka, qiimeynta buundooyinka iyo shahaadada.
- Hubso in qaxootiga ay wakiil ku leeyahiin dawladda hoose, boliiska iyo waaxyada dabka, iwm.
- Adeegsiga iyo helitaanka taakuleynta, sida gaadiidka, guryaha, iyo tarjamada luqadda.

III. Hamiga

Sidee ayaad u sifeysaa guusha naftaada bacdamaa aad tahay qaxooti iyo maxay ka kooban tahay bulshada qaxootiga guuleystay?

- Guusha waxaa lagu sifeyaa in la haysto hawl/shaqo wanaagsan, la dhex galo iyo in lala midoobo, la qaato waxbarasho, la ahaado muwaadin wanaagsan oo u hoggaansama sharciga, niyad iyo siyaasad ahaan laga qeybgalo bulshadaada, laga tago xanuunkii la soo dhaafay, in loo shaqeeyo qoyskaada (guri, raashin la soo saaro miiska).
- Kooxda Soomaalida waxay si tafatiran uga wada hadleen muhiimadda ay leedahay la qabsaiga iyo sii wadidda waxbarashada; waxay aqoonsadeen in ay lagama maarmaan tahay in la qaato waayaha cusub, hal talaabo halkii mar, iyo in la yeesho rajo macquul ah marka la baranaayo luqad cusub iyo nololo cusub.

IV. Natiijadaha

Sidee ayaan ku ogaanaa ama ku cabbirnaa guusha, waxa la samayn karo si loo adkeeyo iyada, iyo maxay tahay sababta ugu fiican oo loo wadaago guusha?

- Tilmaameyaasha guusha waxaa ka mid noqon kara lahaashada ganacsiga, tirada sare ee ka qalin jebisa dugsiga sare iyo waxbarashada ka sii sareysa, mattalaadda dawladda hoose iyo waaxyada boliiska, iyo shaqada ee u ogolaada baahid la yareyay ama joojinta kaalmada dadweynaha.
- Sida ugu fiican oo loo adkeynkaro loona qeybsan karo guusha waa in xariir uu ka dhexeeyo bulshadaha kala duwan, meediyaha bulshada, brograamyada tababarka ganacsiga, iyo dhismaha xariirka.

DARUUSTA LA BARTAY

Adeegsiga Ingiriisiga iyo Tababarka Shaaqada waa

Waaajib: Tababarka luqadda Ingiriisiga iyo tababarka shaqada waa qodobada ugu muhiimsan guusha qaxootiga si ay u noqdaan dadka isku filan waddanka Mareykanka. Marka la sii tilmaamo, qaxootiga geli kara tababarka u gaarka ah shaqqada, ee gacmaha lala galo lagana helo qeyb ku saabsan tababarka Ingiriisiga (sida tababarka ESL) si loo kordhiyo xirfadaha iyo aqoonta waxay aasaaska guusha laga gaaro Mareykanka.

Diyaarinta Qaxootiga: Waxaa jirta kala duwanaa la arki karo xagga heerarka isu diyaarinta shaqada iyo waxbarashada qaxootiga cusub ee dhawaan yimid. Dadka qaar, waxaa loo baahan yahay tababarka waxbarashada aasaasiga si loo baro luqadda aasaasiga iyo xirfadaha akhriska luqadda ay u dhasheen iyo Ingiriisi si dadka ugu noolaadaan heer sare ugana shaqeystaan Mareykanka. Dad kale ayaa Mareykanka la yimaada waxbarasho la taaban karo, xirfadaha luqadda, iyo waayaha shaqada si baahidooda ugu aadanto jidadka shaqada iyo kaalmo si xirfadahooda iyo shahaadooyinkooda iyo waxbarashadooda loogu wareejiyo xoogga shaqada Mareykanka.

Dhiirigelinta Guusha Qaxootiga (Encourage Refugee Success): Dadyowga qaxootiga waxay u baahan yahiin in ay ogaadaan in saraakiisha dawladda iyo dadweynaha guud si dhab ah u rabaan in ay arkaan dadkooda oo gaara horumar iyo guul; halka bulshadaha xaafadda ay horumar ka gaareen horumarinta kala duwanaanta iyo ka-qeybgelinta; qaxooti badan ayaa weli dareema in aan la soo dhaweynin.

Waayaha Mareykanka Dhallinta vs. Qaangaarka Qaxootiga (American Experience for Refugee Youth vs. Adults):

Dhallin iyo qaangaar badan oo ka tirsan qaxootiga waxay ku sugan heerar kala duwan xagga isdhexgalka bulshada Mareykanka maxaa yeelay dhallinta waxay in badan la xariiri karaan qaadashada hiddaha iyo taageerada ay ka haystaan dugsiga, halka dadka waaweyn aysan haysanin. In badan oo ka tirsan waalidiinta qaxootiga iyo jiilalka waaweyn waxay ka cabsadaan in dhallintooda dayaci doonaan ama arki waayaan caadada hiddaha iyo caqiidooyinka kaddib marka ay dhexgalaan hiddaha Mareykanka; waxay aaminsan yahiin in tani sii jeediso ama ahaato wax ku dadban himilooyinka nolosha iyo in ay guuleystaan. In badan oo ka tirsan caruurta qaxootiga jiilka kowaad iyo labaad waxay dareemaan in ay dhexda u galeen labo hiddo, waxay dareemaan fiicnaan iyo in ay dhexgaleen hiddaha Mareykanka hase ahaatee waxay kaloo rabaan in ay xushmad u muujiyaan hiddaha iyo caadada qoyskooda.

Waxaa dhici karto in Qaxootiga aysan aqoonsanin Fursadaha u Doodidda (Opportunities for Advocacy): Caadi ahaan, qaxootiga wadamada

dagaalka ka socda ma aqoonsana sinaan la'aanta ka jira bulshada Mareykanka; xaaladaha ay ka soo tageen waxay badanaa yahiin kuwo aad u fogaaday marka loo fiiriyo waxa ay la kulmaan Mareykanka. Dheeraad, bacdamaa ay sharuudahaas la midka ah uga soo tageen gadaal, inta badan ma ogsoona in ay jiraan fursado ay naftooda iyo bulshadahooda ugu doodaan sinaan.

Waxaa loo baahan yahay Maalgelin muuqata oo la geliyo Bulshadaha Qaxootiga San Diego: Ururada Sida Imaadeyaasha Cusub

Taageero iyo Horumarin (Support and Development) (NSD) iyo Adeegga Qoyska Soomaaliga San Diego Inc. (Somali Family Service of San Diego, Inc.) (SFS) waxay buuxin karaan suuq loo baahan oo soo if baxaayo kuna saabsan ururo xoogga saara jinsiyadda waxay cayaari karaan kaalin muhiim ah xagga fududeynta isku filnaanta iyo guusha Dagmada San Diego. Ururada cayaari kara kaalinta - "dhexdhexaadiyaha hiddaha" ama "xariiriyaha" si qaxootiga loogu kaalmeeyo in ay helaan waxbarashada, fursadaha shaqada, iyo adeegyada caafimaadka iyo bulshada, waxay u baahan yahiin maalgelinta maaliyadda iyo taakuleyn. Tusaale ahaan, qaxootiga ku sugan City Heights iyo El Cajon labadaba waxay soo jeediyeen baahida loo qabo hal xarun oo laga helo wax kasta si wax looga qabto baahida dhamaystiran iyo sii kordheysa ee bulshadahooda.

Karti ku soo Kordheso Ururada Bulshada ee ku Saleysan Jinsiyadda (Ethnic Based Community Organization) (ECBOs): ECBOyada sida, NSD iyo SFS

aad ayay u yar yahiin, badanaa waa ururo qoys maamulo ee ilo qiimo leh siiya bulshadaha qaxootiga. Waa lagu kalsoon yahay, waxaa loo haayaa xushmad bulshadahooda iyo waxay fahamsan yahiin sida tafatiran iyo sida taxadiga haysto qaxootiga u adag yahay. Guud ahaan, ECBOyada waxay qabaan shaqaale iyo ilo kooban oo ku adkeeya in ay si joogto ah ugu jawaabaan baahida isbaddaleysa ee bulshada. Taageero xagga shaqaale dheeraad ah, horumarinta ganacsiga, iyo tababarka waa tusaalooyin ku saabsan sida ECBOyada u baran karaan sida loo dhiso awoodooda una kori karaan sida ururo.

Bulshadaha Qaxootiga Xoogga Saara Baahida

Aasaasiga: Inkastoo mashruuca Qaxootiga RLA bixiyay fursad la yaab leh si qaxootiga looga qeybgeliyo wada wadal ku saabsan bulshadahooda iyo si loogu doodo isbaddal iyo horumarkooda, sida taakuleynta deegaanka ama qaso caafimaadka, iyo sida loogu doodo bulshado caafimaad iyo ammaan qaba; inta ay socoto mashruucaan, waxaa aad u muuqatay in ka-qeybgalka u doodidda iyo dadaalka bulshada tahay wax adag marka qoysaska weli wax bartaan kuna adag tahay si loo habsado in baahidooda lala kulmo. Ilaa shakhsiyaadka ka helaan shaqo daggan iyo dareenka sugidda nolol maalmeedkooda, ayay awood u heli doonaan in ay la xariiraan ururada iyo kooxaha si ay ahamiyad u siiyaan bulshadooda iyo si meesha looga dhigo meel fiican oo lagu noolaado, laga shaqeeyo, iyo lagu cayaaro.

**Fursadaha Iskaashiga RLAyada Mustabalka
(Partnership Opportunities for Future RLAs):**

Dhismaha awoodda ururadooda waxaa dheeraad ku ah, ECBOyada ka qeybgalay hawsha RLA, sida NSD iyo SFS, waxay ballan qaadeen iyo waxay si dhab ah u daneyeen dhismaha awoodda hoggaaminta ka dhexeyso dadyowgooda. Bacdamaa ilahooda iyo shaqaalahooda kooban yahay, sida kor lagu sheegay, dadka inta badan ma laha awood ay ku fulliyaan ama si joogto ah u

hoggaamiyaan kooxaha bulshada ee samaysmay taasoo ka dhallatay RLA in la horumariyo u-doodidooda iyo mashaariicda ku jira gudaha bulshada. ECBOyada yaryar ee aan lahayn awoodda waxay ka fa'iidi doonaan iskaashiga ama qandaraasyada hoose ay la galaan ururada jira si ay u fulliyaan mashaariicda sida Qaxootiga RLA (Refugee RLA), si loogu kaalmeeyo baahida loo qabo maaliyadda, shaqaalaha, iyo tababarka.

GABOGABADA

Brograamka Qaxootiga RLA (Refugee RLA Program wuxuu Iskaashatada Horumarinta Caafimaadka Bulsahda (Community Health Improvement Partners) (CHIP) u ahaa mid laga helay abaal marrin; waxay ahayd markii kowaad oo taxadi firfircoon lagu sameeyo ururka iyo ujeedada hoggaaminta shaqada ka socota gudaha bulshada qaxootiga. Sida horay loogu sheegay warbixintaan, waayaha lagala kulmay Taakuleynta iyo Horumarinta Imaadeyaasha Cusuh (Newcomers Support and Development) (NSD) iyo Adeegga Qoyska Soomaaliga San Diego Inc. (Somali Family Service of San Diego, Inc.) (SFS) waxay ahayd tusaale marka la tixgeliyo ilaha kooban CHIP waajib ku ahayd in uu la qeybsado urur kasta. Qiimaha ay ku soo biiriyeen hawshaan waxay ahayd qaali marka loo fiiriyo ilaha kooban ay CHIP la wadaagtay urur kasta brograamkaan.

Awoodda hoggaaminta la dhisay inta ay socotay hawsha mid kasta oo ka mid ah kooxda xoogga saarta dhallinta waxay ururadaan u ahayd mid xooggan Ku dhawaashada macluumaadka tayada sare ee waayaha Machadka Hoggaaminta Dagganaha (Resident Leadership Academy) waxay sida lagu rajo weyn yahay dhiirigelisay ka-qeybgaleyaasha iyo hoggaamiyeyaasha ururka labadaba in ay si ka duwan uga fakaraan muhiimadda hoggaaminta iyo nolosha madaniga dadka yaryar marka ay galaan qaangaarnimo, taasoo dad badan u dhaw. Fikrado qiimo badan oo ka dhashay la shaqeynta labada dadyowga qaxootiga, qaar ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee laga qaadan karo:

- Cunidda caafimaadka u roon, mid ka mid ah waxyaabaha lagu barto RLA, ma aha mudnaan ama fikrad ay dhallinta RLAdaan la xariireen; waqtigaan noloshooda, ma arkaan manaafacaadka muddada dheer ama baahida loo qabo in la qaato dabeecadaha cunidda caafimaadka u roon.
- Waxaa lagama maarmaan ah in la dhiso sharciyo iyo waxa qofka laga filaayo ka hor inta aan la bilaabin tababarka marka lala shaqeeyo dhallinta. CHIP waxay habkaan RLA ka ogaatay in muddada dareenka dhallinta ka duwan tahay tan qaangaarka, kaddibna si wax looga qabto arrintaan, tababarka waxaa lagu darray waqti nasasho (kuwaasoo loo qeybiyay dariis gaanam. toos u abaara maadada) si telefoonada gacanta iyo faragelinta kale aysan u carqaladeynin tababarka.
- Sida CHIP ogaatay, waxaa jiray kala duwanaa muuqata oo dhexeyso dadyowga qaxootiga Gobolka Bari iyo kuwa daggan Gobolka Dhexe. Kuwa ku sugan Bari waxay jimicsiga u arkeen, gaar ahaan kubadda cagta, sida hab ay ula xariiraan hiddahooda kaddibna loogu kaalmeeyo in ay iska ilaaliyaan in ay ku lug yeeshaan waxyaabo sida burcadnimada iyo isticmaalka qamrada/mukhaadaraadka. Dhallinta Gobolka Dhexe (Central Region) waxay xoogga saareen diintooda iyo hawlaha la xariira taa baddalkii jimicsiga taasoo ka ilaalisa baahida in ay u jeestaan hawlo aan la jeclaan karin.

Wada hadalada la qabtay muddada skaanka deegaanka ee quseeyay qaangaarka, waayeelka, iyo dhallinta bulsho kasta waxay dhalliyeen macluumaad aad u qoto dheer ee xoojin doono iyo wargelin doono brograamyada qaxootiga San Diego, iminka iyo mustaqbalka labadaba, taasoo aad looga baahan yahay bulshadahaan. Fikradaha caadiga ee ka soo baxay labada gobol waxaa ka mid ahaa kuwa soo socda:

- Tababarka luqadda Ingiriisiga wuxuu lagama maarmaan u yahay inta badan qaxootiga, bacdamaa uu ahaa waxa ugu sareeyo ee ku dadban shaqada iyo/ama isku filnaanta lagu muujiyay dhamaan wararka la helay inta uu socday brograamkaan.
- Tababarka shaqada farsamada ee bixiya xirfado gaar oo ku habboon shaqo ama warshadda waa qeyb lagama maarmaan u ah guusha qaxootiga soo gal suuqa shaqada Mareykanka.
- Qaxootiga waxay la yimaadaan heerar kala duwan oo waxbarasho ah, awoodda luqadda, iyo aqoonta akhriska luqadda ay u dhasheen iyo luqadda Ingiriisiga; waxaa muhiim ah fullinta qiimeynta qofka, xooggana la saaro meelaha muhiimka ah. Kaddibna fursadaha tababarka waxaa lagu cabbiri karaa baahida qofka, iyo fasalkada iyo kullamada shaqada waxaa la siin karaa heerar kala duwan taasoo ku saleysan baahidaas.
- Waxaa jirta baahi socota oo loo qabo San Diego in ay isu muujiyo in ay tahay bulsho ku wanaagsan soo dhaweynta iyo ka qeybgelinta, qaxootiga waxay dareemaan in aan inta badan la soo dhaweynin.
- Waxaa loo baahan yahay in xariir badan iyo iskaashi laga helo saraakiisha dawladda iyo dadweynaha guud si loo muujiyo in ay jirto danno loo haayo bulshada qaxootiga loona muujiyo in guusha iyo awoodda ay ku gaaraan horumar tahay mudnaanta kowaad.

Waxaa loo baahan yahay maalgelinta ujeedadeeda tahay in la fududeeyo guusha bulshada qaxootiga la xariirta heerar badan xagga labada bulsho; tusaalooyinka meelaha loo soo jeediyay maalgelinta bulshada waxaa ka mid ah balse kuma eka: waxbarashada, shaqada, guriga, tababarka luqadda, mideynta bulshada, iyo helitaanka ilaha caafimaadka iyo bulshada.

Waxaa muhiim ah in la tilmaamo in El Cajon iyo City Heights ka kooban yahiin bulsho qaxooti kala duwan, heerar kala duwan kaga jira horumarintooda iyo ka mid noqoshada bulshada hiddaha Mareykanka, loona baahan yahay in la aqoonsado maxaa yeelay baahida bulshadahaan ma aha kuwo isla mid ah. Hawe ahatee marka la adeegsado habkaan, waxaa caddaatay in labada bulsho qaxooti aaminsan yahiin in ay leeyahiin hanti qiimo badan ayla wadaagaan bulshadahooda cusub



, sida balse kuma eka: helitaanka xoogga shaqada, ahamiyadda xoogga ee la siiyo qoyska, ahamiyad xoogga ee la siiyo hiddaha, nafsiga, qiimaha ammaanka, iyo rabitaanka tayada wanaagsan ee la rabo in dhamaan bulshada ka hesho. Ugu dambayn, waxaa muuqata in soo bixidda suuq ku habboon Ururada Bulshada ee Ku Saleysan Jinsiyadda (Ethnic Based Community Organizations) (ECHO) ee awoodda u leh in ay u adeegaan sida "dallaaliinta hiddaha" ama "xariiriyeyaasha" bulshadahooda waxay mattasha fursad muhiim ah xagga iskaashiga marka horay loo socdo. ECBOyada waxay awood u leeyahiin in ay kaalmeyaan dadka daggan in ay helaan iyo si buuxdo u fahmaan adeegyada ay iyaga heli karaan, badiyaan kartida hiddaha iyo fahamka. ECBOyada waxay isku xeraan iyo waxay dadka daggan siiyaan adeegyo sida, balse kuma eka:

horumarinta shaqada, adeegyada caafimaadka iyo bulshada, ilaha guriga iyo maaliyadda, iyo fursadaha midaynta bulshada. Waxaa lagu tallinaa in dadka daneeya qaxootiga gobolka iyo iskaashatada sii wadaan in ay sahmiyaan hababka dajinta qaxootiga gobolada kale sida Minnesota iyo Ohio, halkaas oo guusha qaxootiga loo arko qodob muhiim u ah waxqabadka una ah aasaas tayada tilmaamaha nolosha si loo muujiyo nolosha caafimaadka qabta iyo tayada guud ee bulshada.

Sida ay muujiyaan natiijadaha kor lagu soo bandhigay, muddadaan gaaban, waxaa leys dhaafsaday aqoon badan oo nagu kaalmeyn doonto in aan la qabsano brograamyada jira iyo abuura qorshooyin cusub si loola kulmo baahida sii kordheysa ee bulshada. Wadajir ahaan, waxaa la qaban karaa in badan.